

Ifiyaha Nolasha

C/wahaab Aadam Cusman

- ✓ Xikmadaha nolasha
- ✓ Erayo haldoor ah
- ✓ qoraalo muhiim ah
- ✓ Talooyin ku anfacaya

Ifiyaha Nolasha

C/wahaab Aadam cusman

- ✓ Waxaan u hadyadeeyey qofkastoo soomaali ah.....

- ✓ Qofkastoo jecel in uu guul ka gaaro nolasha aduunyada iyo midda aakhiro.....

- ✓ Qofkastoo murugo iyo walbahaar daris u noqday.....

- ✓ Qofkastoo jecel wax aqriska....

- ✓ Iyo asxaabta gaarka ah.....

- **Xuquuqda buugan way xafidantahay**
- **Daabacadii 1aad.**
- **1441-2020**

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِیْمِ

HORDHAC

Waxaan Ku bilaabayaa magaca Allah naxriis guud ahaaneed iyo mid gaareed naxriista

Allah ayaa mahad leh Makhluuqa Rabigood ah, naxriis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaato nabigena Muxamed oo ah midka ugu danbeeya Rususha, run badanihii amiinka ahaa, oo loo soo diray

Bani Adamka iyo jiniba dhamaantood. Nabadgalyana kor kooda ha ahaato asxaabtiisa oo ahaa kuwa Xambaarsanaa bandiirada diinta, iyo dadka wanaaga kuraacay.

Intaas ka gadaal:-

Ka dib markaan aqriyey kitaab uu qoray qoraaga lugu magacaabo **caa'id al-qarni** kitaab kaasoo lugu magacaabo حتى تكون اسعد الناس wuxuuna kaga hadlayaa xikmado muhiim ah iyo erayo dhiira galin ah, sidaas darteed waxaan go'aansaday in inta ugu muhiimsan oo allah ifahamsiyey u tarjumo afka somaliga si ay ugu faa idaystaan xikmadaha dhiiri galinta ah dadka muslimiinta ah ee somaliyeed,

Badanaa erayda hal door ka ah oo aan kusoo aruuriyey buugga aad hadda hordhaciisa aqrinayso waxaan kasoo qaatay kitaabka حتى تكون اسعد الناس in kastoo anna in badan ku kaabay si walaalaha wax badan u faaidaystaan.

c/wahaab aadam cusmaan

30/04/1441

26/12/2019

Erayo dhirigelin ah

- ❖ limaanku wuxuu tagsiyaa muragada iyo dhibta waana il qabowsiga muwaxidiinta (kuwa alla kaliyeelay).
- ❖ Wixii tagay way tageen haka fikirin waxa dhamaaday ee tagay.
- ❖ Xusaka Allah wuxuu xasiliyaa qalbiga, danbiyadana wuu tirtiraa allana wuu kaaga raali noqonayaa, dhibta iyo muragadana wuu feedaa.
- ❖ Hadaad waa bariisato ha sugin galabaysi, ku kulmi hamigaaga hagaajinta maalintaada.
- ❖ Ka tag waxa mustaqbalka imaanaya ilaa uu ka yimaado, ha danaynin Beri maxaa yeelay hadaad maanta wanaajiso Beri ayadaa wanaagsanaanayso.
- ❖ Laazim socodka iyo jirdhiska, ka dheerow caajiska, ka tag firaaqada iyo shaqo la'aanta.
- ❖ Ugu mahad noq rabigaaga nicmada uu ku siyey, ugu mahad noq nicmada diinta, caqliga, caafimaadka, maqalka, aragga, rizqiga.....
- ❖ Miyaadan ogoyan in dadka ay ka mid yihiin kuwo waayey caqliga ama caafimaadka ama maxbuus ah ama imtixaamaysan.

- ❖ La noolow qur'aanka adigoo xifdinaya, aqrinaya, ku tadaburaya, taasi waa dawo midda ugu ween ee lugu cayriyo muragada iyo dhibta.
- ❖ Alle tala saaro u dhiibo taladaada oo idil, ku raali noqo xukunkiisa, asaga magan gal, ku tiirsanow isaga ayaa ku kaafinaya.
- ❖ Cafi cidda ku dulmisay, xiriiri cidda ku jartay, sii cidda wax kuu diiday, udulqaado cidda ku xumaysay waxaad helaysaa farxad iyo amni.
- ❖ Ogow in culayska ka danbeeyo fudeed, dhibtana ka danbeeso faraj. xaalada sidaan masii ahaanayso, maalmuhu way wareeganayaan.
- ❖ Ku farax sida alle kuu dooray maxaa yeelay adiga ma ogid sida maslaxada kugu jirta waxay noqon kartaa in dhibta kaaga khyr badan tahay barwaaqada.
- ❖ Imtixaanka aduunyada wuxuu kuu dhaweynayaa allah wuxuu ku barayaa ducada, wuxuu kaa tagsiyaa kibirka iyo faanka.
- ❖ Ka dheeraw mala xumada, tuur ismoogaysiiska sidoo kale ka dherow waxyaalaha xun iyo fikradaha jiran.
- ❖ Ogow inaadan dhibtu kaligaa ahayn, cidna Kama badbaadin muragada iyo dhibatooyinka.

- ❖ Yaqiinso inay dunida tahay meel imtixaan ku qaabil xaaladeeda allana u kaasho.
- ❖ Ka fakir dadka kaaga horeeyey nolashaan, waxaa ka mid ahaa dad la dheereeyey, la xabisay, la dilay iyo dad la imtixaamay.
- ❖ Wax kastoo ku asiiba ajarkiisa Allah ayaa ku siinaya oo ka mid ah murugta, dhibaata, xanuunka, faqriga iyo gaajada.....
- ❖ Hala fariisan dadka carada badan, xaasidiinta ah maxaa yeelay waa dad xambaarsan murugo iyo dhib.
- ❖ Ku ilaali salaadaha inaad ku tukato jamaaco, badi ku nagaanshaha masjidka, ka caado dhigo u dagdagida salaadaha waxaad heleysaa farxad iyo sacaado.
- ❖ Waxaan kaaga digayaa dunuubta, iyada ayaa ah halka ay kasoo burqato murugta, waxay sababtaa musiibooyin.
- ❖ Yuusan ku saameynin hadalada xun ee lugu dhahaayo maxaa yeelay waxay dhibaysaa qofka dhahay ee adiga kuma dhibayso.
- ❖ Cayda cadawgaaga uu ku caynayo iyo xaasidka waxay ka tarjumaysaa qiimahaaga waayo waxaad noqotay qof muhim ah.

- ❖ Ogow qofka ku xamanayo wuxuu kuu hadyadeeyey wanaagyadiisa taana waa nimco.
- ❖ Ahow geesi sugan qalbigiisa, agtaadana ha ahaato himo sare iyo go'aan yeysan ku kedinin dhibaata.
- ❖ U fur fur wajigaaga dadka waxaad ku kasbanaysaa inay ku jeclaadaan una raarici garabkaa, is-liit way ku waynaynayaan.
- ❖ Bixi waxa wanaagsan, u jilcsanow dadka, dami cadaawada, nabad gali cadowgaaga, la saaxiib dadka wanaagsan.
- ❖ Farxada waxa ugu weyn inay kuu duceeyaan waalidiintaada, ka faa'idayso ducadooda si ay kugu noqoto dhufays adag oo kaga gaashaamato dhibta.
- ❖ Ku noolow nolol dhaxdhaxaysi ka digtoonow taraxtaga iyo xadgudubka.
- ❖ Camalada kala qaybi haka wada dhigin hal waqti ka dhig kuwa ukala dhexeeya waqtiyo si aad firfircooni ugu heshid mida kale.
- ❖ Eeg dadka kaa hooseeya jir ahaan, qaab ahaan, maal ahaan iyo shaqa ahaan si aad u ogaato inaad ka sarayso kumanaan qof.

- ❖ Ka digtoonow inaad dadka dhaawacdid, ahaw mid carabkiisa dadka ka badbadiya. Ahna mid hadal wanaagsan, hareerihisana amaan yihiin.
- ❖ Yeelo waqti aad ku naqoto nafsadaada, aad kaga fakirto aakhiradaada, ku hagaajiso adunyadaada.
- ❖ Kasbo maal xalaal ah ka dheerow xaaranta, ka fogow inaad dadka wax waydiidsato. Dhedhexayso nolashaada.
- ❖ Xiro dhar dhaxdhaxaad ah, oo aan ahyn dhar ay xirtaan kuwa taraxtagay, aan ahynna kuwa ay xirtaan dadka baaseesan noqo dadka caadiga ah oo kale.
- ❖ Ha xanaaqin, xanaaqu wuxuu badalaa akhlaaqda, qaraabada ayuu xumeeyaa, jacaylka ayuu fasahaadiyaa, xiriirkana wuu jaraa.
- ❖ Mararka qaar aad Safar, si aad u cosboonaysiiso nolashaada, usoo booqato qaraabada, usoo daawato waxyaalo kugu cusub iyo saad usoo barto dhulal cusub.
- ❖ Ku bilow dadka salaam ku salaam si dhoolo cadayn ah, sii ihtimaam si aad unoqoto mid ay jecelyihiin una dhow.
- ❖ Ku kalsoonow nafsadaada, dadka haku tiirsanaan ogow inuu san kula jirin qofna Allah mooyee.

- ❖ Ka digtoonow inaad tiraahdo "ha dhow ayaan samaynaa" iyo inaad dib dhigato howlahaaga, taasi waa bilowga fashilka iyo yididiilo xumada.
- ❖ Ka tag noqonoqdka go'aan qaadashada, go'aankaaga qaado ee ku dhaqaaq haduu khayr yahay.
- ❖ Ku dadaal wax-bixinta haba yaraatee, taasi waxay tirtirtaa gafafka, qalbiga ayey farxad galisaa, waxay tagsiisaa murugada waxay siyaadisaa rizqiga.
- ❖ Ku dayo nabi muxamed (naxriis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) asaga ayaa ah hogaamiyaha liibanta, ahna midka natusiyey guusha, ahna midka nugu hanuuniyey wadada badbaadada.
- ❖ Booqo isbitaalada saad u ogaato nicmada caafimaadka, booqo xabsiyada si aad u ogaato nicmada xuriyada, booqo melaha lugu xanaaneeyo dadka waalan si aad u ogaato nicmada caqliga.
- ❖ Ahaaw mid toosan oo akhlaaq leh, afgaabni badan ku hadlin khayr mooyee, waji furfuran, ixtiraama qofka la fadhiya, dhagaysanaya hadaladiisa aanu jarayn hadaladiisa.
- ❖ Mu'minka Kama murgu waxa dhaafay ee aduunyada ah, maxa yelay ma daneeyo, kama baqo.

Dhibaataadeeda wuxuu xaqiiqsan yahay inay dhamaanayso.

- ❖ Inaad indhaha kusii dayso wax yaalaha xaaraanta ah waxay ku dhaxal siinaysaa murugo iyo walbahaar iyo dhaawac haleela qalbiga, qofka liibana waa midka aragiisa hoos uraariciya rabigiisana ka baqa.
- ❖ Haduu xarigu adkaado wuu go'ayaa haduu habeenkii mugdiyaabo wuu feedmayaa, haduu amarka ciriiri noqdo wuu waasacmayaa, kamana adkan karo hal culays 2fudeed ah (فلن يغلب عسر يسرين)
- ❖ Ka fakir naxriista raxmaanka oo u danbi dhaafay naag zaaniyad ah oo waraabisay ey', cafiyeyna Nin dilay 100 qof.
- ❖ Gaajo ka dib waa dharag, oon kadibna waa oon go'is, xanuun ka gadaalna waa caafimaad, faqri dabadeedna waa hodantinimo, murugna waxaa ku xigta farxad. taasna waa arin soo jireen ah oo sugan.
- ❖ Aqri suurada الشرح waxay ku xasuusinaysaa farxada waxayna ku baraysaa sabarka.
- ❖ Hadaad xanaaqdo aamus ka cuuda bilayso shaydaanka, badal qaabkaaga, hadaad istaagsaneed fadhiiso, waysayso badi xuska Allah.

- ❖ Waxa ku asiibay ma ahan waxa ku gafaya, waxa ku gafayna ma ahan wax ku asiibaya, ogsonow wax kasta inay qoran yihiin.
- ❖ U badal khasaarahaaga faaido, ka samay liinta cabitaan macaan, ku dar biyaha musiibada qayb sokor ah.
- ❖ Ka fogey qaylada iyo buuqa gurigaaga dhexdiis, calaamada sacaadada waa dagnaan iyo xasilooni iyo nidaam.
- ❖ Salaada waa waxa ugu khyrka badan ee la kaalmaysto, iyada ayaa kor ugu qaada nafta yididiilo sarsare, waxay kaa badashaa mugdiga kuu badashaa iftiinka.
- ❖ Farxadu waa geed biyhiisu, mirahiisu, hawadiisu, iftiinkiisu yihiin rumaynta Allah iyo maalinka qiyaamo.
- ❖ Qofkii ahaatay agtiisa aadaab wayn, dhadhan wanaagsan, akhlaaq sharaf badan naftiisu ayuu farxad galyey, dadkuna wuu farxad geliyey.
- ❖ Hadaad doonaysid dadka inaad farxad galiso, ula dhaqan dadka saad jeceshahay in lugula dhaqmo, haka nuqsaamin maalkooda.

- ❖ Haduu qofku garto nafsadiisa, garto cilmiga ku haboon uguna istaago sida ugu haboon, wuxuu helayaa macaanka guusha iyo raaxada guusha.
- ❖ Haday ay kala xanaqaan labad zawjayn(labada is qabta) ha aamuso midkood, hana is ixtiraamaan
- ❖ Qofka agtiisa ahaatay xaas, guri, caafimad, maal ku filan waxaa loo soo koobay haldoorka nolashiisa.
- ❖ Aasaaska guusha waa in Allah kaa raali noqdo, dadka agtaada joogana kaa raali noqdaan, nafsadaana raali kugu ahaato iyo inaad qabato shaqo Miro dhal leh.
- ❖ Quudashada waa farxada maalinta, safarkana waa farxada isbuuca, guurkana waa farxada bisha, maalkana waa farxada sandka, iimaankana waa farxada cumriga oo dhan.
- ❖ Adiga ayaa ah ah midka badali Kara nolashaa, keeniKara fikrado badali Kara nolasha, ha dhigin dhaayahaaga muraayad madow.
- ❖ Adoomada Allah kuwa ugu farxada badan waa kuwa ugu bixinta badan wanaaga, lehna walaalo badan dadkuna jecelyhiin.
- ❖ Allaha kaa kaafiyey muragada shalay ayaa maanta kaa kaafinaya mida maanta taagan Allah talo saaro,

haduu alle kula jiro yaad ka baqee? Isaga mooyee yaa kalood rajaynee?

- ❖ Adi iyo dadka maal qabeenka ah waxaa idin dhaxeeya hal maalin kaliya, macaankii shalay ma helayaan, berina adigana ma lihid iyagana ma laha, hal maalin miyaadan adkaysan Karin?
- ❖ Farxada waxay firfircooni siisaa nafsada, waxay qaboojisaa qalbiga, waxay isku dheeli tirtaa xubnaha jirka, nolashana waxay siisaa qiimo.
- ❖ Diinta, Hodan tinamada, amniga iyo caafimaadka waa keedka farxada
- ❖ Haday dhibaato kugu dhacdo ka fakir imisa dhibaato ayuu allah kaa badbaadiyey, allaha kaa badbaadiyey dhibaatooyinkaas ma awoodi waynin inuu kaa badbaadiyo kuwa hadda ku haleelay ee sabar waa imtixaan.
- ❖ Ha qaadan go'aan ilaa aad ka ogaato waxa ku hareeresan kadib Allah u kaasho kadibna dadka aad ku kalsoon tahay la tasho.
- ❖ Qofkii kusifowday nafsadiisa alla ka baqid, qalbigiisa ku dahiray iimaan, akhlaaq wanaagsana Allah siyey, wuxuu gaaray jecelka Allah iyo kan dadka.

- ❖ Nolasha dhamaystiran waa inaad dhalanyara-nimadada ku bixiso yididiilo iyo hansare, waqtiga dhexdhexaadka tahayna ku bixiso halgan iyo ka miro dhalin, odaynimadadana ku bixiso rajo wanagsan.
- ❖ Ku canaano nafsadaada ka gaabin, qof kalana haku canaanan waayo ceebahaaga hagaajintoda ayaa waqtiga kugu buxamay, waqtina uma haysid inaad ku mashquusho ceebaha dadka kale.
- ❖ Asxaabta waxaa ugu wanaagsan kan aad ku kalsoon tahay culaysyada kusoo fodsaarana kula qaata, kulana qaybsada dhibta iyo dheefta, aanan faafinayn sirahaaga.
- ❖ Xaas wanaagsan oo alla ka baqid badan, guri waasac ah, arzaaq kugu filan, daris wanaagsan...maxay nicmadaas dad badan moogyihiin.
- ❖ Inaad ilowdo waxyaalaha la nacayo waa nicmo, inaad xasuusatana nicmadana waa wanaag, inaad mooge ka ahaato ceebaha dadka kale waa fadli.
- ❖ Cafinta waxay ka macdahay aar-goosashada, shaqadana waxay ka raaxo badan tahay firaaqada, qanaacadana waxay ka weyn tahay maalka, caafimaadkana wuxuu ka wanaagsan yahay maalka

- ❖ Kalinimada ayaa ka khayr badan inaad la fariisato qof xun, qof wanaagsan inaad la fariisato ayaa ka khayr badan kalinimada.
- ❖ Dabeecad xumada waa cadaab, cuqdadana waa sun, xantana waa liidanaan, raacraacida cebaha dadka waa dulinimo.
- ❖ Rooti qalalan oo aad ku cunto amni ayaa ka mac malab aad ku cabto cabsi, teendho amni ah ayaa ka wanaagsan guryo filo ah oo cabsi ku qabto.
- ❖ Farxada cilmiga waa mid joogto ah, sharafkiisana waa mid waaraya, xuskiisana wuu baaqi ahaanayaa.
- ❖ Limaanka oo lugu farxo waa farxada dadka wanaagsan, in loo adeego maal dartiisa waa liidnaan, in loo shaqeyo alle dartiisa waa sharaf.
- ❖ Salaada oo jameeco lugu tukto, waajibka oo luguto, muslimiinta oo la jeclaado, dunuubta oo laga tago, xalaal miirad la noqdo, waa guusha adunyada iyo aakhiradaba.
- ❖ Calaamadaha lugu garto doqanimada waa: waqti lumis, towbada oo laga dib dhaco, waalidkoo lugu caasiyo iyo sirahoo la faafiyo.....
- ❖ Qofkaan farxad ku helin gurigiisa meel kale kama helo, qofka maanta dayacana beri wuu dayacay.

- ❖ Kazaahid aduunyada alle ayaa ku jeclaanaya,ka zaahid waxa dadka agtooda ahaaday(maalkood) dadku way ku jeclaanayaan
- ❖ Nolol uma sugnaanin qof quustay, amni uma sugnaanin danbiile, jeceelna uma sugnaanin faajir (qof xun) amaan uma sugnaanin beenaale, kalsooni uma sugnaanin khiyaanoole.
- ❖ Furaha saacaadada waa dhoole cadynta, jeceelkana waa albaabkeeda, darbiyadeedna waa amaanka, imaankana waa iftiinkeeda.
- ❖ Ka yeel farxada mahad noq, murugadana sabir, aamusitanankana fikirid, dhawaaqaana xuska Allah, nolashaana dhaaco.
- ❖ Noqo sida shinbirta oo kale waxay raadsataa arzaaqda subixii, galabkiina way soo laabataa, berina kama fakirto,waxay tal saarataa allah kaligiis.
- ❖ Qofkii badiya ku dhexjirka dadka way ihaanaysanayaan, qofkii bakhiiil ku noqdana way liidayaan, qofkii u dulqaatana way weyneynayaan.qofkii ubaahdana way nacayaan.
- ❖ Shalay way dhimatay, maantana way raad joogtaa, berina maba dhalan, saacad kaliya ayaad haysataa ee ka yeel dhaacada Rabi.

- ❖ Lix waa caafimaad dhamays tiran: diin, cilmi, hodan tinimo, akhlaaq, cafin iyo caafimaad.
- ❖ Ka dheerow dooda foosha xun, boosaska xun iyo saaxibka dabaalka ah.
- ❖ Wuxuu allah kusiyeey labo indhood, labo dhegood, labo gacamood, labo lugood, iimaan, qur'aan iyo amaan....allah maku mahdisay?
- ❖ Waxaad ka badbaaday: dhagoolnimo, indhoolenimo, baras, waali, kansar cuduro xun xun oo dhan... allaha raxmaanka ah ma ku mahdisay?
- ❖ Waxaan ka caajisnay maalinta aan joogno, waxaan ku mashquulnay waxa lasoo dhaafay, waxaan dayacnay maalintena, waxaan ihtimaam siinay Beri...aaway caqligeena? Aaway xikmadeena?
- ❖ qofku inuu qariib noqdo ayaa ka sharaf badan daris xun, wanaagoo la sameyana wuxuu ka sareyaa qasriyada dhaadheer, amaanta wanaagsana waa sharaf.
- ❖ Qofkii agtiisa ahaatay diin hanuunisa (diinta islaamka), caqli haga, nolol qurux badan.....fadliga ayuu kulan saday.
- ❖ Qofkii khilaafka ka taga, rabi caasin faanka ka fogaada, beenta ka nabad gala, wuxuu allah

qadarana raali ku noqda, xaasidnimada ka hajira..allah wuxuu usoo dumayaa qalbiyada adoomihiisa.

- ❖ Ka hor inta aadan seexan saamax dadka, qalbiga ku dhaq cafinta, Allah danbi dhaaf waydiiso, aqri adkaaraha ka hor hurdada la aqristo...Waxaad heleysaa macaanka iimaanka.
- ❖ Asbaabaha keena murugada iyo walbhaarka waa in laga jeesto diinka Allah, aduunyadana la qaabilo...qofka sameya sidan wuxuu noqonayaa qof xabsi daa'in ah ku jira, nolol iyo geeri aan la hayn.
- ❖ Qofkii laazima masjidka: wuxuu faa'idaysanayaa aayad, walaal wanaagsan, cilmi wax anfaca, naxriis uu sugayo, kalimad wax anfacaysa iyo tawbad wanaagsan.
- ❖ Qofkii sooma quudashada ayaa uwanaagsanaanayso, qofkii istaagana (قيام الليل) hurdada ayaa uwanaagsanaanayso, qofkii deeqsi ahna mahad noq ayaa ubadanaayo, qofkii madax noqdana cadow ayaa ubadanaayo.
- ❖ Farxada waxay ubaahan tahay amni, maalkana wuxuu ubaahan yahay sadaqo, sharafna waxay

ubaahan tahay shafaaco, madaxtinimadana waxay ubaahan tahay tawaaduc(is-liidit)

- ❖ Raaxo gaari maysid daalka kadib mooyee,jeceelna gaarimaysid aadaab wanaagsan kadib mooyee,,,,,
- ❖ Badanaa hal shay oo aad cuntay ayaa kuu diidaysa inaad wax badan cunto, hal hadal ood dhahdana ayaa soojiida cadowtinimo badan, hal xumaan ood samayso oo kuu diida khayr badan..
- ❖ Maalmahaaga maalinta ugu wanaagsan waa: maalinta aad dulqaad samayso, cilmi faa'idaysato, danbina samayn, fahan fiicana aad heshid, go'aan wanaagsana qaadatid..
- ❖ Nolashu waa jaanis oo aan la garanayn marka lawaayo mooyee, caafimaadkana waa taaj aanu arkayn dadka xanuunsan mooyee.
- ❖ Goormuu farxad uu sugayaa qof leh caruur caasi ah, xaas dhib badan leh, daris xunna leh, saaxiib caajisoole leh, nafsadiisana xun tahay..
- ❖ Rabigaaga xaq ayuu kugu leeyahay, nafsadaada xaq ayey kugu leedahay, aragaaga xaq ayey kugu leeyihiin, xaaskaaga xaq ayey kugu leedahay, dariskaagana xaq ayuu kugu leeyahay.sii midkasta xaqiisa.

- ❖ Tawfiiqdu waa: khaatumo wanaagsan, hadal toosan, camal suuban, dulmi ka dheeransho iyo qaraabadoo la xiriiriyo.
- ❖ Maalka waxaa ugu khayr badan kan ku anfaca, cilmina waxaa ugu wayn kan kor kuu qaada, gurina waxaa ugu wanaagsan midka ku deeqa, asxaabna waxaa ugu wanaagsan midka kuu naseexeya.
- ❖ Hadaadan xaasid lahayn khayr ma lihid, hadaadan saaxiib lahayn dabeecad ma lihid, hadaadan diin lahayn mabda' ma lihid.
- ❖ Hadaad ka fakiraysid arzaaqda beri, yaa kuu damaanad qaaday inaad beri gaarayso, hadaad ka murugaysan tahay waxa shalay kugu dhacay yaa kuu soo celin kara shalay.
- ❖ Xuska allah, allah ayaa ku raali noqda, qofkuna wuu ku farxayaa, shaydaankana wuu ka baqayaa, muragadana wuu tagsiinayaa, miizaankana wuu buuxinayaa.
- ❖ Runta waa xasilooni, beentuna waa shaki, xishoodkuna waa tosnaan, cilmiguna waa xujo, afgaabnidana waa xikmad.
- ❖ Waxa ugu wanaagsan aduunyada waa jeceelka allah, janadana waxa ugu wanaagsan waa aragtida allah,

kutubta midka ugu anfacida badan waa kitaabka allah.

- ❖ Maxaa ka wanaag badan qof haduu nimco helo mahdiya, hadii la imtixaamana sabra, haduu danbaawana danbi dhaaf dalba, hadii laga xanaajiyana dulqaaad sameya, haduu dad xukminayana cadaalad samaynaya.
- ❖ Haduu qof uu ku dhibo xasuuso fadliga cafinta, ajarka dulqaadashada iyo samirka.
- ❖ Camal suuban sameey, han sarena lahoow, ajashaada sug, ku mashquul hagaajinta nafsadaada, carabkaagana ilaali.
- ❖ Qofkii ku raali noqda allah, qalbigiisa waxaa ka buuxsamayo nuur iyo iimaan, yaqiin, jaceel, qanaaco iyo amaan.
- ❖ Faqirow sabar, sabar wanaagsan waxaad ka nabad gashay maal raaricidiisa, dhibta ilaalinta maalka iyo xisaab dheer
- ❖ Maxaad ugu fakiree waxa aadan haysan ku mana mahdinaysid waxa lugu siyey, maxaad u ilowsan tahay nicmada aad haysato, maxaad ugu qooma meenee nicmo kaa maqan, maxaad dadka u xasdaysaa taadana moog tahay?

- ❖ Boqorka waxaa lugu aasayaa shaqaalaha agtiisa, madaxweynaha waxaa lugu aasayaa ilaaladiisa agtooda, maal qabeenkana waxaa lugu aasayaa faqiirka agtiisa hayeshee qabriga gudihiisa waxaa ahaaday camalo kala duwan.
- ❖ Hadii aad qof wanaag ugasho iska jir inaad xasuusiso, hadii uu qof adiga wanaag kuu glana iska jir **inaad ilowdo**
- ❖ Haduu maalka kaa lumo waxaa kaa lumay shay qiimo badan, hadii sharafta kaa luntan waxaa kaa lumay shay aanu maal goyn Karin, hadii kalsoonida kaa luntana waxaa tahay **faqiir waxkasta seegay.**
- ❖ Waligaa hala murmin doqonka waayo waxaa laga yaabaa in dadku idin kala garan waayaan.
- ❖ Dulqaad yari iyo deg-deg waa xididka dhibaataada kuma qasbi kartid nolasha inay kusiiso jawaabo, ama sidaad rabto inay wax kasta u dhacaan, waa inaad ogaataa in culays kasta ka danbeeyo fudeed, waa inaad **aqbasha in wax kasta qaataan waqti.**
- ❖ Ha ka dhigin farxadaada inay ku xirnaato wax waqti kooban ah, ama wax aad wayi doonto, alle raali galintiisa ka raadso farxad waayo isagaa baaqi ahaanaya.

- ❖ Faynuusta maranaba mahadsho. waxay isku soo bandhigtaa iftiinkeeda, kuwa guulaysta marnaba ma ahan inay naftood buunbuuniyaan balse wax qabadkooda ayaa la rabaa inuu soo **bandhigo oo hadlo.**
- ❖ Marnaba been ma noqoto run, qalad ma noqdo sax, xumaan ma noqoto wanaag xitaa haday rumaystaan ama aqbalaan dad badan.
- ❖ Goortii xumaan lugu sameyo dadka daciifka ah way aargoostaan, dadka xooganna way cafiyaan, dadka caqliga leh way **hilmaamaan.**
- ❖ **Ku** qanacsanoow waxa aad haysato, hana ka fakirin wax aadan haysan, waxa aad haysato waxay ku timid nicmada alle, waxa aadan haysanna waxay ku timid xikmada allah.
- ❖ Ha unoqon adoon shaqadaada, haku lumin waqtigaaga wax aadan dan kugu jirin, haku dayacin daryeelka nafsadaada mada-daalo micno la'aan ah, ha u baa bi'in nafsadaada wax aan **hormar ku gaarsiinaynin.**
- ❖ Aargoosiga ugu weyn waa inaad hore usocoto, cafiso, iska ilowdo kuna dadaasho **inaad guulaysato.**

- ❖ Ka fogow boosaska xun ee lugu doodo waayo diinka ayaa lugu iibsanayaa lacag yar, akhlaaqdana waa lugu dhaawacayaa, cirdigana waa lugu tumanayaa.
- ❖ Ducada aad ku ducaysato markaad sujuud santahay waa waxa qalbigaaga sida dhabta ah urabo, waa meesha kaliya aysan fikradahaaga ka awood badin **Karin dareenkaaga.**
- ❖ Masoo galyso malaaijta guru uu kujiro ey', sidoo kale deganaan masoo galayso qalbi walwalsan oo wax aan haboonen isku furay.
- ❖ Tartama. waayo zamanka wuu socdaa, qoraxdu way socotaa, dayaxu wuu socdaa, dabayshu way dhaba naysaa sidaas ayey kolanyada nolosha usocdaan.
- ❖ Cayda ay wajahayaan kuwa guusha raadinaya waa horudhaca guushooda iyo ogaysiismo horumareed.
- ❖ Haku gaar yeelin umuurahaaga nafsadaada ee la tasho dadka.
- ❖ Wadada ugu sharafka badan waa tan masaajidka, midda ugu amaansan waa tan gurigaaga.
- ❖ Dhagaysiga qur'aanka, xuska allah iyo bixinta maal xalaal ah, iyo dhagaysiga waanooyinka dhaxalgalka ah waa xasiloonida qalbiga.

- ❖ Akhlaaqda wanaagsan iyo habdhaqanka suuban wuxuu ka qurux badan yahay quruxda wajiga waayo quruxda qalbiga ayaa ka wayn mida wajiga.
- ❖ Ha go'aansan go'aan adigoo xanaaqsan waad ka qoomameenaysaa hadaad sidaa samayso.
- ❖ Haka dalbin dadka inay ku ixtiraamaan, marka hore ixtiraam nafsadaada ka dib dadka ayagaa ku ixtiraamaya, haku ceeben fashilkooda ee ku ceebey nafsadaada fashilkeeda, hadaad doonaysid dadka inay ku sharfaan marka hore sharaf nafsadaada.
- ❖ Qofkii siiya nafsadiisa waxkasto oo ay ka dalbato waxaa kala tagtagay qalbigiisa, wuxuu dayacay howlihiisa.
- ❖ Shinbirka ugu matimaado arzaaqda hoygiisa, libaaxana ugu matimado arzaaqda booska uu fadhiyo, quraanjada yar ugu matimaado arzaaqda godkeeda, hayeeshee dhamaantood way raadsanayaan quudkooda ee adne uraadi si ay uraadiyen oo kale.
- ❖ Inaad ka dib dhacdo safarka waxaa lagayaabaa in uu khayr kuu yahay, gabar aad doonaysay inaad guursato ood wayso waxaa lagayabaa in ay khayr kuutahay, shaqo aad wayso waxaa laga yaabaa inay

maslaxo kuu tahay, waayo alle ayaa og adigu se ma ogid.

- ❖ Dhibaato kasto ku asiibta waxaad ka baranaysaa cashar lama ilooban ah, ee baro wadada badbaadada.
- ❖ Qofka ku dadaalaya caan bixis kumeel gaar ah, ma deeqdo amaan wanaagsan oo joogta ah, cilmi wax anfaca, camal suuban waayo waa qof daciif ah oo han sare lahayn.
- ❖ Hadaadan rabi caasin, qofna aadan dulmin ku raaxayso ilqabowski. Hambalyo waad nasiibsatay, camalkaagana wuu wanaagsanaday.
- ❖ Maxaa ka wanaag badan qof iska hurda dadkana u ducaynayaan, maxaa ka xun qof soojeda dadkana habaarayaan.
- ❖ Hadaadan cadaalad ka helin maxkamadaha adunyada ugudbi dacwadaada maxkamada aakhiro. Marqaatiyaashu waa malaa'ik, dacwadana way qorantahay qaadigana waa allah.
- ❖ Bishaarayso. dahaara qaadashada waa iimaanka barkii waxay tagsiisaa xumaanta, waxay tirtaa gafafka, ajarna way kuu ziyaadisaa.

- ❖ Kaneecadu waxay usoo banbaxdaa libaaxa, waxay isku daysaa inay dhibaato gaarsiiso balse asaga ihtimaam masiyo xitaa uma milicsado xageeda.waayo danihiisa ka badan.
- ❖ Musiibada nagu dhacday waa :Allah kaliya Kama baqno. Waxaan ka baqnaa inaa dibdhacno, inaa wax khaladno, in uu xanaaqo hebel, in uu shakiyo hebel.
- ❖ Dad badan waxay rumaysan yihiin in farxadkasto tagayso, muraga kastana joogayso. Waa si-xun wax ufahmid.
- ❖ Nabi yuunis(عليه السلام) wuxuu ku jiray caloosha xaywaan weyn in muddo ah, wuxuu fariimo degdeg ah udiray rabigiisa isagoo alle baryey islamarkiiba waxaa utimid warcelin dhamaystiran iyo gargaar.
- ❖ Hadaad adheecdo rabigaaga, waxa aad haysatana ku qanacdo, wax aadan haysana ka murgin.waxaad gaartay meesha loo baahnaa.
- ❖ Waxaa haboon inaad lahaato ujeedo cad sida: inaad raadiso meel aad ku noolato, shaqo haboon iyo wixii lamid ah.
- ❖ Wuxuu umaleyaa qofka ku lumiya maalintiisa oo dhan baashaal iyo ciyaar in uu sidaa farxad ku

helaayo. balse ma oga in uu farxada gacmihiisa ku jarjarayo.

- ❖ Waxaa haboon in niyada iyo qalbiga soo xaadiriso marka aad cibaadada gudanayso. Khayr malaha cilmi aan fahan lahayn, salad aan khushuuc lahayna macaan malaha, quraan aqris aan ku tadabur lahayna dhadhan malaha.
- ❖ Saxaabigii bilaal (**allah haka raali noqdee**)waa la garaacay, waa la cadaabay, kuleelka ayaa meel barxad ah lugu xirxiray. Dhibkaas oo dhan kama hor istaagin in diintiisa ku sugnaado, wuxuu ahaa mid ku cel celiya:(allah kaligii). Marka haku badalan diintaada aduunyo yar. Ku dhegnaw ilaa aad ka geeriyoto.
- ❖ Dadka midka ugu caqliga badan waa midka ugu cudur daarashada badan.waayo wuxuu xambaray culays yadooda , wuxuu udulqaatay canaanta ay ugaysanayaan
- ❖ Nolashu ma ahan **mid** adag marka aad ku xiran tahay alle, laakin way adkaanaysaa marka aad ka tagto dhaacada rabi sida: salaada, sakada, soonka.

- ❖ Toosnow mar walba maxaa yeelay **waxaa** laga yaaba in daqiiqadaas inay noqoto midda ugu danbesa nolashaada.
- ❖ Wax walbo oo aad haysato waxaa ku jira xikmad, hadaan laheli lahayn wax xun marna ma garan lahayn qiimaha waxa wanaagsan.
- ❖ Ha dhihin waligaa: waqti igu filan ma haysto, ogow dadka horumarka gaaray dhamaantood waxay **heestaan 24 saac** maalintii.
- ❖ **Guusha** waxay leedahay dhadhan u gaar ah, kaliya waxaad dhadhamin kartaa markaad soo dhadhamiso qaraarka dhibta.
- ❖ **Iska ilaali** 6daan qodob:
 - Nafsadaada inay markasta jeclaato xumaanta.
 - Cilmi aanad ubaran alle dartii.
 - Maalkaaga oo ku dhexelsiya bakhaylnimo iyo damac badan.
 - Waqti firaaqo kugu soo maray oo aad kafaaidaysan.
 - Caqligaaga oo kusiya khiyaamenta dadka.
 - Inaad xaasidid qof uu ilhy nimco siyey.
- ❖ **Biyuhu** waa waxa ugu jilicsan hadane waxay dilaaciyaan dhulka, waxayna dhaqaajiyaan dhagxaan,

waxay dajiyaan markab dhan. Tani waxay si cad kuu tusinaysaa mabda'a ah in dabacsanaan&dagnaanaad kaga guulaysan karto wax aad u adag.

- ❖ **Haka** caajisin, hana is dhiibin, halganka aad maanta ku jirto wuxuu kuu diyaarinayaa awooda aad beri ubaahan tahay, dhibkastoo kusoo maray waxay fursad u ahayd koritaankaaga qofnimo.
- ❖ **Qofna** inta qabrigaaga soo istaago ma oranaayo "wuxuu wadan jiray mobil qaali ah, waxay xirneet dhar qaali ah, wuxuu kaxaysan jiray gaari qurux badan. laakin inta god yar lugu galiyo ayaa lagaa soo dhaqaaqayaa, kaliya waxaa ku raacaya camalkaaga.
- ❖ **Qof** miskiin ah ama baahan haduu uu wax kuwaydiisto, haka baxhiilin. Sii waxa aad awoodo.ogow sabab baad kukulanten adiga ayaa lugu eegayaa inaad wixii alle kusiyey wax ka bixinayso iyo inkale.
- ❖ **Waxa** wanaagsan ayaa umuuqan kara xumaan hadii dhanka mugdiga ah ka eegto, waxa xun ayaa umuuqan kara wax wanaagsan hadii dhanka iftiinka ah ka eegto. Sida dadka wax u arkaan ama u cabiraan ayaa kala duwan.

- ❖ Ku raali noqo qadarta lajaangooyey, arzaaqda lugu siyey shay kastana waa la qadaray.
- ❖ Ka daahiri qalbigaaga xaasidnimada, xiqdigana ka nadiifi, cardana kasaar, bakhiilnimadana ka zuuli.
- ❖ In wanaaga afka ka sheegto waxaa ka wanaagsan in dhaqankaaga laga arko, cilmi aan lahayn camal waa sida dameer dusha malb usaaran oo kale.
- ❖ Qof mar walba ku wanaajiya hadii aadan wanaagiisa ugu abaal gudi Karin, waxaa haboon inaad ugu abaalgudo mahadnaq iyo dhiiri galin waxa uu kuu qabtay, ma ahan in aad usii tilmaanto baahidaada.
- ❖ Maxaa ka wanaag badan raadka cibaadada kuu samayso: qalbiga ayey ifisaa, wajiga ayey dhalaalisaa, rizqiga ayey waa sicisaa, jirka ayey awood siisaa, allena wuu ku jeclaanayaa, hadii alle ku jeclaadana dadka way ku jeclaanayaan.
- ❖ Ibnu cabaas(allah haka raali noqdee) wuxuu yiri:-
raadka ay xumaanta reebto waa-madow wajiga ah,
mugdi qalbiga ah, daciiftinimo jirka ah, nuqsaan riziga kusoo darisa iyo dadkoo ku naca.(1)
- ❖ Mararka qaar waalidka waa sida janada aduunka oo kale, balse inaga sidaa uma dareeno

- ❖ Sida aan ugu baqno in sharafta ay lunto ama lugu ciyaaro uguma baqno geerida mana ugu fakarno.
- ❖ Waad dhimaneh waad ogtahay waa hubaal marka waqtigaaga soo galo balse waxaa nasiib daro ah inaad adigoo xumaan ku jirta iyo danbi dhaaf la'aan dhimato.
- ❖ Qofka sabarka kaa shaday nolasha kuma jabo.
- ❖ Dhaqankaaga waa ka fiirin gudbin dheer yahay waxa aad afka ka sheegto.
- ❖ khayr usamee asxaabtaada waxay kuu ziyaadinayaan jaceelka ay kuu qabaan, khayr usamee cadowgaaga waxay noqonayaan asxaabtaada.
- ❖ Hadaadan haynin wax aad dadka siiso, ku sadaqayso hadal wanaagsan iyo dhoola cadayn dhab ah ula dhaqana dabeecad wanaagsan.
- ❖ Carabkaaga ha ugu raali ahaan lasocdka aragaaga oo aad wax ka sheegto cebaha dadka kale. Ha iloobin in dadku kula mid yihiin oo adna ledahay ceebo.
- ❖ Aqri taariikhaha, ka fakir layaabka ay xambaarsantahay taariikhda, dhagayso qisooyinka si aad wax badan ugu ogaato nolasha.
- ❖ Ku dadaal nadaafada dharkaaga, wanaaji qaabkaaga, kuna dadaal cadayga iyo catarka.

- ❖ Ha aqrinin bugaata ka sheekeya wax yaalaha xun, nolol burburin, quusashada iyo wixii lahal maala.
- ❖ Xasuuso in rabigaaga uu yahay mid danuubta dhaafa, uu aqballo tawbada, uu cafiyo adoomihiisa. Sidoo kale xasuuso in rabigaaga uu yahay mid cadaabkiisa xanuun badan yahay.
- ❖ Badi istiqfaarta(danbi dhaaf dalabka) waxaa la jira . arzaaqda, farajka, caruurta, cilmi wax anfaca iyo gafafka oo lagaa tirtiro.
- ❖ Wax waangsan rajay, niyadaana wanaaji, ha quursan, rabigaagana malaha u wanaaji.
- ❖ Ogow dhibta ku haleshay inay indhaha kuu furayso, qalbigana noolaynayso, rabigaagana nicmadiisa xasuusanayso.
- ❖ Ahow deeqsi wax bixin badan. Taasi waxay waasicinaysaa qalbiga, iska ilaali bakhiilnimada taasi waxay sababtaa ciriri iyo dhib haleela laabta.
- ❖ Ha noqon laba wajiilee soomuujista waji midka kalena u qarsan kula dhaqan dadka dabeecad wanaagsan.
- ❖ Ku dadaal adkaaraha subixii iyo galabkii way ku ilaalinayaan, shaydaankana waad kaga

magangalaysaa, maalintaana way kuu wanaagsanaysaa.

- ❖ Haku shidin qalbigaaga caro, cadawtoyo iyo dadkoo lanaco waayo taasi waa cadaab joogto ah ee kasaar qalbigaaga waxyaalaha xun.
- ❖ Ha noqon sida tixsiga oo kale oo kaliya wuxuu ku dhacaa meelaha dhaawaca ah, ka digtonow inaad ku dhacdo cirdiga(sharafka) dadka muslimiinta iskan ilaali inaad xamato ama dhaawacdo.
- ❖ Ka fakir guulaha aad gaartay iyo miraha shaqooyinka aad qabatay taasi waxay sababtaa in laabtaada waasac noqoto.
- ❖ Dadka qaar waxay dhahaan:marka aan danbi galno allena ugu tawbad keeno islamarkiiba waxaan ku laabanaa danbigii aan hadda ka tawbad keenay. Taasi waxaa lugu xalin karaa adigoo mar qaabka wanaagsan ee loo maro tawbad keenida. Tawbudu waxay ubaahan tahay go'aan adag oo la qaato allena loo kaashto inaad ka harto dunuubta.
- ❖ Nicmadoo lugu shukriyo waxay difaac utahy inaad nicmadaas wayso, dunuubta oo laga tago waa nolasha qalbiga, nafsada oo laga guulaysto waa guusha mesha ugu danbeesa.

- ❖ Aabahena aadam wuxuu cunay geed laga reebay cunidiisa taasi waxay keentay in uu yimaado dhulka, halka marka hore uu joogay janada. Danbigii uu galay wuu katawbada keenay allena wuu ka aqbaly. Wuxuuna rabi dhabarkiisa ka soo saaray nabiyaal, culimo, shuhado iyo dad wanwanaagsan. Sidaas oo kale rabi ulaabo tawbadu way furuntahy, allena adoonkiisa utowbad keena tawbada wuu ka aqbalaa.
- ❖ Salaadu waxay kuu hagaajisaa jadwalkaaga, ka yeel salaadaha ka dib shaqo ku anfacda ee hanoqon midka dhahaayo (waqtiga waan dilayaa!) oo kale.
- ❖ Nabi ibraahiim (calayhi -salaam) waxaa lugu tuuray dab alle wuxuu ugu yeelay qabow nabadgalyo ah, wuxuu ka ilaaliyey boqorkii gaalka ahaa ee lugu magacaabi jiray namruud, wuxuu kabad baadiyey shirqooladii ay gaalada udageen isagoo kaligii ah allah wuu ugargaaray.
- ❖ Muuji sunada nabi muxamed (naxriis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaato) haka xishoonin, diintana ku dhegnow ilaa kaga geeriyooto, walaashayda muslimada ah ku dhegnow xijaabka sharciga ah hana isku ekaysiin gaalada duliga ku dhacy. Qofkastoo muslim ah haku sabro dhibka iyo cayda loo

gaysanayo.qofkastoo diintiisa si toos ah ugu dheгнаaday waa lasoo dhibay.

❖ Nabigeena muxamed(naxriis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaato) gaaladii quraysha way dhibeen, yahuuda iyo nasaarana dhib ween ayey ugeesteen, wuxuuna dhadhamiyey nocyada kala duwan ee dhib ah, waxaana lugu tilmaamay waali, sixroole, been abuurasho, waa lala dagaalamay, waa lacayriyey, magaaladiisa ayaa laga saaray... dhibka loo gaystana warqadahaan yar kuma soo aruurin karo intaaso dhib ahna oo loo gaysatay kam hor istaagin in uu dacwada gaarsiyo daafaha caalamka.

❖ Saxaabigii waynaa ee lugu magacaabo abuu bakar(allah ka raali noqdee) wuxuu xambaaray dhibaato badan, wuxuu fudedsanayey waxyaalaha adag, wuxuu maalkiisa oo dhan ubixiyey sidii loo koryeeli lahaa diinta allah, wuxuu bixinaayey waxyaalaha qaaliga ah iyo waxyaalaha raqiiska ah, wuxuuna ku guulaystay inuu helo magaca ah (الصديق), isagoo aduunka joogana waxaa loogu bishaareyey jano.

- ❖ Cumar bin khadhaab(allah ka raali noqdee) wuxuu dhex dabaashay dhiigiisa isagoo salaad ku jira. wuxuuna ahaa mid cadaalad soo dabaalay.
- ❖ Cusmaan bin cafaan(allah ka raali noqdee) waxaa ladilay isagoo qur'aanka aqrinayo sidoo kale sooman.
- ❖ Cali bin abii dhaalib(allah ka raali noqdee) waxaa ladilay isagoo masaajidka kasoo baxay, wuxuu lakulmay dhibaatooyin sida buuraha oo kale u culculus dhibkaas oo idilna wuu xambaaray.
- ❖ Cabdulaahi bin zubayr(allah ka raali noqdee) waxaa lugu go'doomiyey kacbada, goortii danbena lugu dhex dilay.
- ❖ Imamu axmed bin xanbal(allah ha unaxriistee) wuxuu galay xabsi dhib badan waa lagaraacay mawqifkiisana ma badalin.
- ❖ Luguma soo koobi karo bogog yar dadkii nolashaan kusoo rafaadauay ugu dambeentiina ka raaxaystay dhibka aduunyada.

Qormo kusaabsan akhlaaqda wanaagsan

waa maxay akhlaaq ?

Akhlaaqdu waa dhaqan ama suurad ku qarsoon gudaha.

Culimada waxay dhahaan:qofku waa 2suuradood waa muuqaal muuqda iyo mid qarsoon, muuqaalka muuqda waa sida dadka umuuqata, midka qarsoon ayaa ukalabaxa 2qaybood mid xun iyo mid wanaagsan. Tanina waa mida laga cabiro qofka akhlaaqda uu leyahay.

Imisaa loo qaybiyaa akhlaaqda?

Akhlaaqdu waxaa loo qaybiyaa 2qaybood: mid waa sida uu allah kugu abuuray, midna waa lakasbadaa. Akhlaaqda waa shay aad uwanaagsan oo in badan oo naga mid ah ka maqan, waxyaalo bandanna ayaa soo hoos gala sida:la dhaqanka dadka, shaqada, dhimrinta, hadalka iyo hanaankiisa wanaagsan. Waa astaan wanaagsan qofka u horseedi karta waxyaalo badan.

Akhlaaqdu wuxuu allah ku amaanay nabi muxamad(naxriis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ahaa midka dadka ugu akhlaaqda

wanaagsan, hadaan isku dayno inaan ka hadalno akhlaaqdiisa marnaba xaqeed ma oofin karno.

Noocyada Akhlaaqda(1)

– Fikir Wanaagsan, Filasho Fiican iyo Laab saafi ah.

Qofka waxa u wanaagsan inuu markasta uu dadka kale ka fisho wanaag, shakigana uu ka fogaado, maxaayeelay dabeecadaha wanaagsan waxaa ka mid ah malada fiican ee dadka kale laga fisho.

Samafalka.

Qofka wanaagsan meel kasta oo uu tago samafalkiisu ma joogasado, qofkii wanaag sameeyana xumaanta ayay ka dhowrtaa, dhibaataadana way ka hortagtaa.

Xiriirinta Qaraabada.

Waa mid ka mid ah dhaqamada uu Alle ugu jecelyahay, cimri dherer iyo xoolo badnaanna ayaa laga dhaxlaa.

Ballanta oo la dhawro.

Waa mid ka mid ah astaamaha qofka mu'minka lagu garto, ballanta ma jabiyo haddii waxwalbaaba ay ku dhaafayaan oo uu khasaarayo, dhamaantenna waan

ognahay raganimo iyo ballan ka bixis inaaney meel isla gelin.

Sadaqada.

Qofka akhlaaqda wanaagsan sifooyinkiisa waxaa ka mid ah sadaqada oo uu siiyo dadka faqiirka ah iyo kuwa kale ee u baahan, maxaa yeelay qalbi dahab ah ayaa Alle ku manneystay. qofka wax bixinta badan waxa uu ogyahay in sadaqadu ay ka mid tahay camallada ugu wanaagsan ee uu Illaahay jecelyahay.

Salaanta.

Qofka waxaa ku habboon inuu salaamo qofka uu garanaayo iyo kan aanuu garaneyn, Nabi Maxamed (naxriis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) ayaa waxa uu na faray inaan salaanta faafinno, qofka aan garaneynno iyo ka aanan garaneynin intaba aan salaamno, waana mid ka mid ah sababaha ay dadku ay isku jeclaadaan.

Ceebahada Dadka oo aan La Faafin.

Waa sifo in badan ka maqan, in walaalkaa sirihiisa aadan faafin, gaadaashiisana aanad ka hadlin, waa astaan ay

leeyihiin dadka qiimaha badan isla markaana istaahila in la ixtiraamo.

Waalidka oo loo Sama Falo.

Dadka oo dhan way necebyihiin caasi waalideynka, qofka caasiga ah waa mid aad u akhlaaq xun, waxaanuu istaahilaa eraybixinno intaa ka culeys oo waa qof xumaantiisa aan la tilmaami karin.

Hadalka wanaagsan.

Qofka akhlaada wanaagsan hadalkiisuna wuu wanaagsan yahay, dadka wanaagooda wuu ku ammaanayaa, qofka xumeeyana wuu u qoslaa oo wuu wanaajiyaa. Noocyada akhlaaqdu aad ayay u badan yihiin lamana soo koobi karo, waxaa ka mid ah samirka, dulqaadka,I.W.M.

(1) G.education.

Sidee loo kasbadaa akhlaaqda wanaagsan:-

- Caqiidada toosan oo lugu dhago.
- Cibaadada oo lugu dadaalo.
- Nafsada oo lugu jihaado.
- Inaad ka fakirto waxyalaha wanaagsan ay akhlaaqdu ledahay.

- Inaad ka fakirto saamaynta xun ay ledahay habdhaqanka xun.
- Inaad noqoto qof wanaaga amra xumahana reeba.
- Inaad ku sifowdo sabarka.
- Inaad akhriso qisooyinka dadka akhlaaqda wanaagsan.
- Inaad la saaxibto qof akhlaaqdiisa wanaagsan tahay.
- Inaad alle ka barido in uu akhlaaq wanaagsan ku siyo.
- Inaad ka dheerato waxyaalaha xun.

Intaa kaliya ma ahee waxaa jira kuwo badan oo kaa caabinaya inaad noqoto qof akhlaaq wanaagsan.

Qormo ku saabsan afgaabnida (afdaboolan waa dahab)

In badan oo inaga mid ah waxay raadinayaan degnaasho iyo guul iyo ka dheeraansha ha fadhi ku dirirka iyo hadaladada badan sidoo kale waxay doonayaan inay ku sifoowaan afgaabni iyo akhlaaq badan aygoo raadinaya inay helaan sifada qaaliga ah ee afgaabnida oo ah sifo qofkasta heli karin, in badan markaad fiirisid dadka guusha ka gaaray nolasha waxaad arkaysaa ayagoonaan ahayn kuwa hadal badan laazimayna sifada afgaabnida markay isku milanto buuqa dadka iyagana waxay ahaayeen kuwo dagnaasho iyo aamusida kamuuqda.

Waxaa la dhahaa fanka afgaabnida waa cilmi ka adag kan hadalka badan qaar ayaa u fasirta inay tahay dacfi shakhsiyadeed, hayeeshee waa fani aanu ku sugnaan Karin ilaa dadka caqliga leh mooyee....balse meelaha qaar Ayaanu ficnayn inaad iska afgaabnato waana mar mar uun.

Faa idooyinka afgaabnida

1-Afgaabnida ama hadal yarida waxaa lugu tiriya sifo kamid ah sifooyinka akhlaaqda wanaagsan, qofku caradiisa ayuu aad u xakameeyaa ilaa uu gaaro heer u kasbado raali ahaanshaha allah, sidoo kale waxay jawaab waafi ah utahay qofka kaa xanaajiyey

2-waxay daliil u thay akhlaaqda wanaagsan

3- waxaa ka dhalanaayo inuu allah ku jeclaado deetana dadka

4-waxay sababataa inay ku ixtiraamaan dadka kale haba ugu darnaatee meelaha muranka idin kala dhaxeeyo dadka kale.

5-inaad waqti u hesho inaad si fiican ufakartid oo wax badan aad guul uga gaartid.

Hadaba maxaa laga yiri afgaabnida

-**Haduu** hadalka badan yahay qalin. afgaabnidana waa dahab

-**Qofka** caqliga leh waa midka garanayo goortuu hadlaayo iyo goortuu aamusayo.

-**Waajib** ma ahan inaad ku hadaaqdo waxaad taqaano oo dhan, lkn garo waxaad ku hadlayso.

-**Marnaba** kama shalayn afgaabnida balse waxaan ka shaleeyey hadal badnida in badan

-**Inbadan** waxay u arkaan inay saamaxaadu tahay jab, Aamuistaankuna yahay daciiftinimo, laakin ma garanayaan inay saamaxaadu doonayso awood ka badan

aargoosiga, aamusitaankuna wuxuu ka awood badan yahay hadalka badan.

-qof hadal badan ixtiraamkiisa wuu yaraanayaa

-hadaad doonaysid inaad ku dhawaaqdo hadal xasaasi ah ka fakir intadan ku hadlin, hadaad maslaxo u arkto ku hadal hadaad shakido iska daa haku hadlin.

-Shaqsiga guulaysta waa midka xirta afkiisa ka hor intaysan dadku dhagaha ka xiran, waa midka dhagaha fura ka hor intaysan dadku afka furan.

-Waxaa jira su'aalo aysan ka jawaabi Karin dadkoo dhan ilaa kuwa afgaaban mooyee hadaba iswaydii jawaabta aynoqon karto?

-Afgaabnow markay waajib noqoto aamusitaanka, haa aamusin marka uu waajib noqdo hadalka.

-Sirkastoo soo dhaafta 2qofood waxay ku baahaysaa tiro aadan filanayn

-Nafsadaada waxaad xakamayn kartaaa maalinka aad hadaladaada xakamayso.

f.g : markaan leeyahay afgaabnow ma ahan micnaheeda waligaaba ha hadlin blse waxaan ulajeeda hadalada badan ka dheeraaw oo ha noqon qof watigiisa ku bixiya hadalka badan xakamayn waaya hadaladiisa.

Qormo ku saabsan sabarka.

Sabarka:waa inaan xabisno nafsadeena.

Qeexid kale Sabarka waxaa loola jeedaa inaan nafteena ka joojino dhaqanka ah inay quusato ama murogooto si fool xun oo qaawan, in aan carabkena ka joojino cabashada aan dadka u cabanayno.

يا ايها الدين امنوا اصبروا وصابروا ورابطوا واتقوا (الله لعلمكم تفلحون)
ALCIMRA-200

Nafta qofka bani aadamka ah had iyo jeer waa mid imtixaan ku jirta. Sida dhamaantena wada ogsonahay imtixaanka uu qofka bani aadamka ah maro ayey waxay isugu jiraan kuwo kala duwan.

Qaar imtixaamka ka mid ah ayaa ah qaar qofka loogu nimceynayo oo waxkasta uu qorshaystay siduu rabay uhelayo. Qofka caqliga lihi waa mid ku mahad naqa nicmadaas uu rabi siyey, midna ma xasuusanayo nicmada allah uu siyey.

Sabarkana waa mid ku muhiim ah nolasha qofka bani aadamka ah waana sifo aanan gaari Karin qofkasta marka laga reebo qofkii allah gaarsiyo mooyee. waxaana sabri kara qof dulqaad iyo qof xakamayn kara nafsadiisa..

- Waa in qofku ku sabraa musiibooyinka uu allah ku imtixaamayo.
- waa in lugu sabraa dhibta aduunyada.
- waa in la sabraa marka aad wayso qof aad jecleed.
- waa in la sabraa markaad inamadaa wayso.
- Waa in la sabraa marka aad waalidiintaa wayso.
- Waa in lugu sabraa waxbarashda.
- Waa in lugu sabraa cibaadada.
- Waa in lugu sabraa qabowga kugu dhacaya marka aad cibaadada gudanayso.
- Waa in la sabraa marka howlahaaga cariiri kugu noqdaan.
- Waa in la sabraa marka aad howlaha adag qabanayso.
- Waa inaad ku samirtaa shaqadaada waayo waa wajib ku saaran inaad ehelkaaga nafaqayso.
- Waa inaad samirtaa marka uu qof kugu xadgudbo.
- Waa inaad ku samirtaa marka luguu diro howlo naftu dhibsanayso.
- Waa inaad ku sabirtaa amarada uu waalidka ku siinaayo.
- Waa inaad sabartaa.....
qofkii sabraa sadkiisa leh.

Hadaba imsaaloo qaybiyaa samirka?

Samirka waxaa loo qaybiyaa 3 qaybood:

- In lugu sabro dhaacada rabi. Dhamaan cibaadooyinka waxay ubaahan yihiin sabar iyo go'aan sida: salaada, sakada, soonka, in loogu yeero dadka khayrka, in laga tago sharta, in loo dagdago cilmiga barashadiisa iyo jihaadka.
- In laga sabro macaasida: waa inuu noqdaa qofka mid dunuubta ka dheeraada nafsadiisa haba cadaadisee. Eeg qisada nabi yuusuf (عليه السلام) markay naagtii boqorka ugu yeertay xumaanta isagana uu allah ka magan galay.
- In lugu sabro waxa allah qadary. Waa inaad ku sabirtaa musiibada iyo dhibta ogsonowna in uu allah qadaray cid hor istaagi kartana aysan jirin.

Maxaa laga yiri sabarka:

- Sabar waad gaaraysaa waxaad rabto oo wanaag ah.
- Sabar culayska waxaa ka danbeeyo fudeed ogsonow wax kasta in waqti leyhiin.
- Dagnaantu waa nabad galyo, degdagana wuxuu ka ahaaday shaydanka waana shalyto.

- Ahow qof dulqaad badan marka lagaa caraysiyo, sabar marka musiibada kugu dagto.
- Waxkastoo imaanaya way imaanayan, murg kastana waxaa udanbeeyo inay feedanto. Shayna sidiisa masii ahaanayo.
- Ka baro ubaxa bashaashnimo, shinbiraha ka baro sida arzaaqda loo raadsado, shinadana ka baro nidaam, quraanjadana ka baro shaqo, waraabahana ka baro sida baahida loogu sabro.
- Dulqaadashada iyo sabarka waxay ka mid yihiin waxyaalaha ugu fiican ee canuga la baro si waxbadan ugu sabro ay ka mid yihiin cibaadada iyo kuwo kale oo aan kor kusoo xusay.
- Guusha waxay timaadaa ka dib markaad sabarto.
- Sabarka ma heli karo qofkasta ee nafsadaada ku dhib inay sabarto.
- Maxaa ka qurux badan qof marka la xumeyo iska cafiya, marka la dhibo iska sabra isagoo awoodi kara in uu jawaabo bixiyo.
- Sabarka waa fakta hore.
- Nafsadaada bar sifooyinka wanwanaagsan. bar dulqaadka, bar cafinta, bar wax bixinta, bar inay salaadaha masaajidka timaado, bar in aroortii waqti

hore soo toosto, bar sida dadka loola dhaqmo, bar sida loo sabro.

- Sabarka iyo salaada waa ashyaada ugu fiican ee la kaashto marka dhib kula soo dariso.
- Musiibada markay dhacdo In la argagaxo oo waxyaalo aan habooneen la sameyo iydaa musiibo ah

.....
Faa idooyinka laga helo sabarka waxaa ka mid ah:

- Qofka sabarka badan wuxuu noqanayaa qof uu allah jecelyahay.
- Sabarku wuxuu sabab u yahay inaad janada gasho.
- Sabarku wuxuu sabab u yahay in qalbiga xasilooni helo.
- Qofka sabarka usaaxibka ah waxaa usugnaaday bishaaro.

Faa idooyinka sabarka halkan luguma soo koobi karo.

.....

Gaba gabo

Allah ayaa ku mahdsan iifududeeyey inaan qoro
buugaan yar.

Waxaan Allah ka rajaynayaa in umada muslimka
Ah ee soomaaliyed ay ka faidaystaan.

Waxaan saxay allah ayey ka ahaaden waafijinta
Rabi kaligiis ayaa leh.

Waxaan khalday nafsadayda iyo shaydaan ayey
Ka ahaaden..

Fg. Hadii wax khaladaad ah ku arakto waan ka
Cudur daaranayaa waayo waxaan ahay bani
aadm.
